



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.excalibur.org.uk

Talaada 25^{ta} Febraayo 2025

Gacaliyayaal Qoysas,

Ku soo dhawaada Xilliga 4 oo aan ogahay inuu ahaan doono mid mashquul ku ah dabbaaldega Maalinta Buugaagta Caalamka, dabbaaldega Ciidda, fiidka qoysaska iyo waxbarashdeenna maalin laha ah!

Waxaan dhawreynaa maalinta Buugaagta Caalamka ee sannadkaan akhbaar dheeri ahna dhawaan ayaa lagu soo diri doonaa kuwaasoo ku saabsan booqashooyinka Foyles bookshop, sheekooyinka waqtiga jiiifka iyo kuwo kale. Haddii aad dooneysid in aad naga caawiso usbuuca buugga adigoo sheeko ku sheegaaya luqad kale ama sheeko ku akhrinaaya luqad kale, waxaan jeclaan lahayn inaad noo timaadid oo aad noo sheegtid. Waxaa u riyaqaansannay luqadaha badan ee dugsiga dhexdiisa laga isticmaalo.

Mahadsanidiin dhammaan qoysaskii ka soo qeyb galay kulankii u dabbaaldega Ciidda – waxaan la hadleynaa shaqaalaha cunta-karinta hadda taasoo ku saabsan soo jeedintiinnii qada Ciidda ee dugsiga waxaanna kugu soo dhaweyneynaa inaad nagala qeyb qaadatid agaasinka dabbaaldega waqtiga dugsiga ka-dib ah. Waxaan jeclaannay fikradda ah inaad la wadaagtiin waxyaabaha ay cuntada ka kooban tahay ee aan ardayda ugu karin karno dugsiga dhexdiisa– fadlan soo dir si aan annagana iskuugu dayno marka hore!

Waxaan dhawreynaa in aan ku kulanno fiidka waalidka ee dhammaadka xilligaan.

Mahadsanidiin,

Mrs L-H

Badbaadada Internetka



Fadlan ka fiiri lifaaqa xayeysiin ku saabsan badbaadada internetka ee khuseysa taleefannada Smartphones. Xusuusnoow in aad hubisid inaad isticmaashid habka 'koontaroolka waalidka' qalab walba ay carruurtaada isticmaalaayaan si aad uga caawisid in ay nabdoonaadaan. Fadlan xataa hubi in Apps ay soo dejisanaayaan ayna isticmaalaayaan. Waxaad baari kartaa da'da loo oggol yahay app walba si aad u xaqiijisid in ay ku habboon tahay.

Taariikhaha Xusuus-Qorka

6^{da} Maars – maalinta Buugaagta Adduunka, dabbaaldegyo usbuucaas oo dhan
 17^{ta} Maars – Maalin INSET, dugsiga waa u xiran yahay ardayda.
 18^{ka} iyo 19^{ka} Maars – Fiidka Qoysaska
 Dhammaadka Maars – Ciid, waxaan dhawreynaa inaan qabanqaabinno qadada Ciidda, laga yaabee in ay noqoto 1^{da} Abriil ay la socoto xaflladda dabbaaldega dugsiga ka dib ee 4^{ta} Abriil.
 7^{da} Abriil – 17^{da} Abriil – fasaxa Deyrta
 21^{ka} Abriil iyo 5^{ta} Meey – waa fasaxa Bank Holiday dugsii ma jiro.



Imaanshaha Attendance

Celceliska imaanshaha dugsiga ee usbuucii ugu dambeeyey ee xilligii hore wuxuu ahaay **94%**.

Yoolkeenna waa 96%. Imaansho wanaagsan waxay carruurta oo dhan siisaa fursadooyinka macquulka ah ee waxbarashadooda marka fadlan arrintaan nagu caawin.

Hambalyo Fasallada **5** kuwaasoo gaaray imaansho **97%** usbuucii hore– waxaad dhaafteen yoolkeenni 96%. Waxaa xigay yoolka fasalka **4** oo keenay imaansho **95%**.

Xasuuusin inaan fileyno in carruurta dugsiga joogaan xilliga waxbarashada. Haddii uu canug maqan yahay isagoo aan cudurdaar lahayn, ka dib 10 xisadood (5 maalmood), waxaa laga yaabaa in lagu soo diro ganaax. Maqnaanshaha aan la oggolaanin khasab ma aha inuu ahaado waqti xiriir ah ee wuxuu noqon karaa waqtiyo kala duwan. Maadaama ay Ciid nagu soo fool leedahay, waxaa xasuuusin ah waxaa la oggol yahay 1 maalin oo keli ah oo ah dabbaaldeg diineed. Waxaad u baahan tahay inaad xafiiska la hadashid si aad ugu sheegtid maalinta aad maqnaaneysid.

Measles

Waxaa jira walaac ku saabsan cudurka Measles-ka ee ku soo badanaaya Bristol iyo Gloucestershire, fadlan fiiri warqadda lifaaqa akhbaar dheeri ah.

Workshops



Dahmaadkii xilligii hore, waxaan sameynay workshops ay bixiyeen kooxda SCARF – kuwaasoo la xiriira waxbarashadeenna PSHE, iyo Redstart, a money charity. Carruurta waxay mar kale ogaanaayaan ahaanshaha qof caafimaad qaba, nabdoon iyo lacag keydsiga. Aad ayey ugu mahadsan yihiin qoysaskii naga caawiyey workshop fasalka 1.

Kulannadii Ciyaaraha ee fasaxa



Aad ayuu u mahadsan yahay qof walba oo ka soo qeyb galay kulannadii ciyaaraha ee waqtigii fasaxa oo ay bixinaayeen Bristol Sport – Aad ayaa looga soo qeyb galay qiyaastii 30 carruur maalin walba. Waxaan maqalnay in carruurta ku fiicnaayeen oo ay ahaayeen basketballers una muujiyeen dadkii Bristol Sport ka socday in ay diyaar u ahaayeen, ixtiraam badnaayeen ayna nabdoonaayeen.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumbo warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630